
# Wac taleefonkeena talobixinta qarsoodiga ah

Marka qofku ehel la yahay maxbuus, qofku wuxuu  lahaan karaa waxyaabo badan oo kala duwan oo **dareeno iyo fikrado ah iyo su'aalo badan oo aad jawaab u la'dahay** Isla markaa, waxa jiri kara howlo badan, oo ay tahay in qofku ku talogalaa. Sidaas darteed waxaad wici kartaa taleefonkeena talobixinta qarsoodiga ah, halkaasoo ay diyaar ku yihiin talobixiyeyaal si ay kuu caawiyaan adiga. Marka aad na soo wacdo, waxaad nagala hadli kartaa wax walba.



**Tusaale, waxaan  kaa caawin karnaa su'aalaha sida:**

- Sidee ayaan u qorshayn karaa dhaqaalahayga?
- Ma ka heli karaa Degmada caawimaad kirada guriga ah?
- Maxaan u sheegaa ilmaha naga dhexeeya iyo xannaanada carruurta?
- Waa sidee waaya aragnimda qoysaska kale in la soo booqdo qof xabsi ku jira?
- Sidee ayuu u dhacayaa kiiska ciqaabta?

Na soo **wac** maalmaha shaqada oo dhan inta u dhaxaysa saac **10:00 ilaa 15:00 galabnimo** (Khamiisaha ilaa 17:00 ) taleefon: **28 80 60 00**

# Xubin ka noqo kooxdeena gaarka ee Facebook-ga

Haddii aad ehel la tahay maxbuus, waxaad xubin ka noqon kartaa kooxdeena gaarka ee Facebook-ga. Halkaas ayaad ku sameyn kartaa inaad **waydiiso su'aalo** talobixiyeyaalka SAVN oo aad timaado lana soo xiriirto ehelo kale. Halkaas ayaad kala heli kartaan talooyin oo isa siineysaan tabo/qaabab, si dhibaatooyinka kala duwan ee isku cakiran aad xal ugu heshaan.

**Xubin ka noqo** kooxdeena gaarka ee Facebook-ga ee bogga: savn.dk/lukket-facebook-gruppe

## Qoraal noogu soo dir

Mararka qaar waxaad dareemeysaa culeyska oo kaa dega markaad qorto fikradaha iyo wel-welka ku heysta. Waxaad sidaas darteed qoraal ku soo diri kartaa oo aan leenahay **sanduuq waraaq**  ama **nagula soo xiriir mail** haddii aad u baahan tahay inaad fikradahaaga qof kale u sheegto.

**Ku soo qor** sanduuq waraaq bogga: savn.dk/brevkasse ama qoraal noogu soo dir kontakt@savn.dk

## Xitaa waad heli kartaa caawimaad, marka lagu soo xiray

SAVN xitaa waxey ugu deeqeysaa talobixin adiga, maxbuuska ah isla markaana ah waalid. Ma qabtaa su'aalo ku saabsan, sida aad ilmahaaga ugu ahaan lahayd waalidka ugu fiican adigoo isla makaana, lagu dhigay xabsi? Weydii qofka xiriiriyahaaga wixi ku saabsan fursadaha inaad qeyb ka noqoto koox waalidiin ama aad ka hesho xirfadlaha-carruurta, iyo talobixinta taleefon ahaan uu kuu siineyso SAVN, xilliga jeelka aad ku jirto.

# Xigto ma la tahay qof maxbuus ah?

**– Markaa waxaan kuugu deeqeynaa taageero iyo  talobixin**



Na soo **wac** maalmaha shaqada oo dhan inta u dhaxaysa **saac 10:00 ilaa iyo 15:00** talefonkuna waa: 28 80 60 00

SAVN Carruurta iyo ehelada maxaabiista

# Waxaan taageernaa oo talo siinaa ehelada maxaabiista

Halkan SAVN waxaan caawinnaa adiga, **uu qof qoyskiisa ka mid ah ama saaxiib uga jiro xabsi**. Tusaale ahaan waxey noqon kartaa in hooyadaa ama aabahaa, ama lammaanahaaga, lammaane hore ama ilmahaaga hadda la soo xiray ama la dhigay xabsi. Waxa xitaa ay noqon kartaa, inaad taqaan qof, xabsi ku jiray muddo dheer.

Waxaan diyaar u nahay inaa kaa caawino su'aalahaaga iyo wel-welkaaga, annagoo mar walba ku saleyneyna xaaladdaada.

Waxaad buuggaan yar ka akhrisan kartaa wixi ku saabsan adeegyadeenna kala duwan waxaadna ka heli kataa, midka **kugu haboon ee kuugu fiican adiga**.

Waxaad sidoo kale wax badan ka akhrin kartaa www.savn.dk

# Kaalay imow degaanka qoysaska oo ay joogaan ehelo kale

Adiga iyo qoyskaaga ma u baahan tihiin inaad ka heshaan **taageero iyo talobixin** talobixiyaheena qoysaska? Ma tabeysaan inaad la kulantaan dad kale oo xaaladdiinna oo kale ku jira? Markaas waxaad tagi kartaa meesheena degaanka qoysaska, oo loogu talogalay dhammaan ehelada maxaabiista. Degaanka qoysaska, waa **bilaash** waana fursad fiican, oo aad kula **kulmi kartaan dadka kale,** oo ay soo martay qaar ka mid ah waaya aragnimada aad leedihiin.

Waxa aad inta lagu jiro fasaxa-toddobaadka iyadoo xogta la dhowrayo ka qayb qaadan kartaa **wada-hadalada kooxeed iyo wada-hadalada carruurta-iyo qoyska.** Talobixiyaheena qoyska waxuu idinkala hadli doona wixi ku saabsan xaaladda gaarka ah ee aad hadda ku jirto iyo waxa, idinku adag dhab ahaan adinka. Waxaa joogi doona dhallinyaro, ay shaqadoodu tahay  **iney la joogaan carruurta**.

Waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan degaanka qoyska, oo **is diiwaangeli** adiga iyo qoyskaagaba oo gal bogga:
savn.dk/familieophold

# Kaalay imow socodka fasaxa-toddobaadka iyo dhallinyaro kale

Ma tahay **inta u dhaxayso 13 ilaa 18 sano oo hooyadaa, aabaahaa, walaalkaa ama walaashaa midkood xabsi ma ku jiraa**? Markaas waxaad tegi kartaa socdka fasaxa-todobaadka ee SAVN oo dhallinyarada loogu talogalay. Marka qofku leeyahay xubin qoyskiisa ka mid ah, oo xabsi ku jiro, waxa fiicnaan karta inaad bal wax yar **ka fogaato howl-maalmeedka** lana sheekaysato **dhalllinyaro kale** ee iyaguna xaaladdaada oo kale ku jira. Waxey ahaan kartaa caawimaad in lala kulmo dad kale, oo iyaguna qabo dareenada iyo wel-welka qofku qabo oo kale.

Socodka fasaxa-toddobaadka ee SAVN ee dhallinyarada, waxa talobixiyaha qoyka ka abuuraa jawi, halkaas oo aad isku dhaafsan kartaan waaya-aragnimada iyo fekradaha. Inta lagu jiro fasaxa-toddobaadka, waxa xitaa jira wakhti badan oo lagu ciyaaro (ciyaar dhallinyaro), kubad,  iyo socodka la aado, cunto lagu kariyo weel – iyo waxyaabo kale oo **howlo farxad(madadaalo)**.

**Is diiwaangeli** oo ka akhri wax badan oo ku saabsan socdka fasaxa-toddobaadka ee dhallinyarada bogga:
savnungdom.dk/weekendtur

